

? Maxaan sameyn karaa haddii qof ka tirsan qoyska ama in ka badan aanay codsan karin dhalashada Maraykanka, noqoshada wadani Maraykan ah ama aanay heli karin sharci imigarayshan oo u banaynaya gargaarka?

Sharciga waxa lagu daray gargaar la siinayo wada-joogista qoysaska "isku-dhafaan." (Qoys isku-dhafaan waa qoys leh xubno uu u banaan yahay helitaanka sharci imigarayshan iyo xubno aanuu u banaanayn helitaanka sharci imigarayshan.) Qoysaska isku-dhafaan waxa u banaanaya kara mid ka mid ah laba nooc oo ah gargaar*:

1. Sinaan-u-qaybinta gargaarka

Haddii qoysku uu qaadan jiray gargaarka hoyga (housing assistance) laga bilaabo 19-kii Bisha Lixaad 1995, SHA waxay si siman u qaybin doontaa gargaarka. SHA waxay si siman u qaybin gargaarka iyadoo la eegayo inta qof ee qoyska ay u banaan tahay inay helaan gargaar (halka laga eegi lahaa isku-darka tirada xubnaha qoyska).

2. Dib-u-dhigista joojinta ee ku-meel-gaadhsiiska ah

Haddii qoys isku-dhan ay u banaanato gargaarka sida siman loo qaybiyay laakiin uu qoysku go'aan ku gaadho inaanuu aqbalin gargaarka sida siman loo qaybiyay, ama haddii qoys leeyahay xubno cusub oo uu u banaan yahay sharci imigarayshan, waxa dhici karta in qoyskaa ay u banaan tahay dib-u-dhigista joojinta gargaarka si ku-meel-gaadhsiiska ah. Waxay taasi qoyska siinaysaa wakhti dheeraad ah si xubnaha qoyska ee aan lahayn sharci u banaynaya gargaar u helaan guri kale oo la iska-bixin karo.

Ardayda aan dhalasho Maraykan haysan. Ardayda aan haysan dhalasho Maraykan ama aan wadani Maraykan ahayn ama aan haysan sharci u banaynaya gargaar uma banaan mid ka ah waxyaabaha sare.

Habka Racfaan-qaadashada. Kireystayaasha waxa la siin doonaa fursad ay INS kaga codsadaan racfaan (ambii) ama ay SHA kaga codsadaan dhageysi garsoor marka kasta oo ay helaan ogeysiis ka joojinaya gargaarka hoyga iyadoo eegayo xeerka wada-joogista qoysaska.

* Haddii qoyskaaga ay ku jiraan xubno aan lahayn sharci u banaynaya gargaarka *adiguna* aad qaadanaysay gargaar ilaa 19-kii Bishii Lixaad 1995, waxa ku qabanaya xeerar kale. Fadlan la hadal qof ka tirsan shaqaalaha.

Warka ku qoran qoraalkan yar waxa uu ku saleysan yahay xeerarka ku yaalla Xeerka Federalka "Code of Federal Regulations (CFR) Title 24 Part 5 Subpart E: Restrictions on Assistance to Noncitizens."

Hay'adaha ku caawin kara

Isbahaysiga Xuquuqda Soo-guuraaga iyo Qaxootiga (Coalition for Immigrant and Refugee Rights) waa urur ay ku bahoobeen hay'adaha adeegga ee degmada ee u guntaday inay caawiyaan dadka gargaarka hoygu u banaan yahay iyadoo:

- dadka ka caawinaya qaadasha dhalashada Maraykanka iyo barashada afka Ingiriisiga;
- qofka u eegaya in codsiga dhalashada Maraykanku u banaan tahay iyo in kale, iyo iyadoo eegaya qofku Ingiriisiga inta uu ka yaqaano iyo baahidiisa kaleba;
- caawinaad ka bixinaya codsiga hoyga ee loo geynayo SHA; iyo
- ka caawinaya dadka inay diyaar u noqdaan kuna guuleystaan wareysiga qaadasha dhalashada Maraykanka ee ay qaado INS.

La soo xidhiidh xubnaha Isbahaysiga Xuquuqda Soo-guuraaga iyo Qaxootiga (Coalition for Immigrant and Refugee Rights) si lagaaga caawiyo codsiga gargaarka hoyga (housing assistance):

Asian Counseling and Referral Service (La-talinta Aasiyiinta iyo Adeeg Gudbin)
206-695-7600

Center for Career Alternatives (Xarunta Shaqooyin Beddelaad ah)
206-322-9080

Chinese Information and Service Center (Xarunta Warka iyo Adeegga ee Shiinaha)
206-624-4062

East African Community Development Council (Golaha Horumarinta Beesha Bariga Afrika)
206-261-6343 or 206-721-0896

Horn of Africa Services (Adeegyada Geeska Afrika)
206-760-0550 or 206-344-5872

Jewish Family Services (Adeegyada Qoyska Yuhuudda)
206-461-3240

Refugee Women's Alliance (Isbahaysiga Dumarka Qaxootiga ah)
206-721-0243



PorchLight

Community Services of the
Seattle Housing Authority
(Adeegyada Beesha ee Maamulka
Guryaha Seattle)
907 N.W. Ballard Way, Ste. 200
Seattle, WA 98107-4637
206-239-1500 (T)
206-239-1770 (F)



Sida sharcigaaga imigarayshanku u saameyn karo gargaarka hoyga



Sharciga federalku waxa uu qorayaa in daganeyaasha Guryaha Dawladda ee Loogo Talagalay Dadka Dhaqaalahuudo Hooseeyo (Low Income Public Housing) iyo dadka ku jira guryaha "Section 8" inay noqdaan kuwo haysta dhalashada Maraykanka ama ah wadani Maraykan ah ama haysta sharci imigarayshan oo u banaynaya helitaanka gargaar dhaqaale. Qoraalkan yari waxa uu sharaxayaa wixii aad sameyn lahayd haddii aanad haysan sharci imigarayshan.



Waxa la heli karaa qaabab ama siyaabo beddelaad ah.

Waxa aanu u guntanay in aanu ka dhigno alaabtayada, adeegyadayada iyo barnaamijyadayada kuwo ay heli karaan dadka leh naafo. Haddii aad leedahay naafo una baahan tahay in lagaa caawiyo buuxinta habka codsiga ama sidii aad u kireysan lahayd guri, fadlan naga codso caawinaad. Tusaale ahaan, waxa aanu ku siin karnaa waraaqaha codsiga oo ku qoran far waaweyn ama qaabab kale oo beddelaad ah. Haddii aanu codsigaaga wax ka qaban kari weyno, waxa aanu isku dayi doonaa in aanu helno siyaabo kale oo lagu haqabtirayo baahidaada. | SHA-38 (Rev. 10/03)

? Sharcigayga imigarayshanku ma saameyn karaa gargaarkayga hoyga?

Marka la eego sharciga federalka, dhamaan daganeyaasha guryaha Maamulka Guryaha Seattle (Seattle Housing Authority) iyo xubnaha qoyska ee qaata lacag-ka-bixinta federalka waa inay cadeeyaan haddii ay haystaan dhalasho Maraykan, ay yihiin wadani Maraykan ah ama ay haystaan sharci imigarayshan oo gargaarka u banaynaya. Shuruudaasi waxay saameynaysaa barnaamijka Guryaha Dawladda ee Loogu Talagalay Dadka Dhaqaalahoodu Hooseeyo (Low Income Public Housing program) iyo dhamaan barnaamijyada 'Section 8'.

Sababta oo ah SHA waxay doonaysaa inay siiso dhamaan xubnaha qoyska fursadda ugu fiican ee ay ku awoodi karaan inay codsadaan dhalasho Maraykan ama sharci imigarayshan oo u banaynaya gargaar:

- **SHA ma xaqiijiso** haysashada dhalashada Maraykanka ama xaaladda sharciga marka la joogo wareysiga qaabilaadda.
- **SHA ma xaqiijiso** haysashada dhalashada Maraykanka ama xaaladda sharciga wakhtiga kireysashada guriga ama bixinta foojarka (voucher).
- **SHA waa inay xaqiijisaa** xaaladda sharciga marka la gaadho xaqiijinta dhaqaalaha ee sannadlaha ah ee joogtada ah ee ugu horeysa (certification of income) (waa sannad ka dib marka la kireysto guri ku jira barnaamijka).

Haddii adiga iyo dhamaan xubnaha qoysku haystaan dhalasho Maraykan, ay yihiin wadani Maraykan ama haystaan sharci imigarayshan oo u banaynaya gargaarka, waxa kuu sii socon doona helista lacag-ka-bixinta federalka aad ka heshid.

? Maxaa dhici doona haddii aniga may xubnaha qoyskaygu aanay haysan sharci imigarayshan oo gargaarka u banaynaya sannad ka dib?

Haddii adiga ama in ka badan oo ka tirsan xubnaha qoyskaaga aanay sheegan karin, ama aanay sheegan dhalasho Maraykan, wadani Maraykan ama aanay haysan sharci imigarayshan oo gargaarka u banaynaya, **qasab ma ah in guriga lagaa saaro**, laakiin waxa dhici karta in lagaa yareeyo ama lagaa joojiyo lacag-ka-bixintii federalku ku siin jiray.

Haddii aad qabtid wax su'aalo ama walaac ah oo ku saabsan xaaladda sharcigaaga imigarayshanka ee khuseysa gargaarka hoyga, waa inaad la xidhiidhiid qof ka mid ah shaqaalaha 'PorchLight Housing Center' (Xarunta Hoyga ee PorchLight).

Fahmidda "sharci imigarayshan oo gargaarka banaynaya"



Dadka aan haysan dhalasho Maraykan waxay noqon karaan kuwo haysta sharci imigarayshan oo u banaynaya gargaarka haddii ay ka mid yihiin noocyadan dad ee hoose:

1. Soo-guuraaga (immigrants) iyo shaqaalaha beeraha ee gaarka ah

Waa qof aan haysan dhalasho Maraykan oo si sharci ah loogu oggalaaday inuu wadanka u soo galo daganaansho joogto ah (permanent residence), sida ku qeexan Qaybta 101(a)(20) ee Xeerka Imigarayshanka iyo Dhalashada (Immigration and Nationality Act) (INA), qofkaasoo ah soo-guuraaga (immigrant), sida ku qeexan Qaybta 101(a)(15) ee xeerka INA (8 U.S.C. 1101(a)(20) iyo 1101(a)(15) hadba mid)(soo-guuraaga). Noocan waxa ku jira qof aan haysan dhalasho Maraykan oo loo oggalaaday soo-galista wadanka iyadoo la raacay Qaybta 210 ama 210A ee xeerka INA (8 U.S.C. 1160 ama 1161), shaqaalaha beeraha ee gaarka ah, ee la siiyay sharci daganaansho oo ku-meel-gaadhsiis ah; ama

2. Dadka aan haysan dhalasho Maraykan ee daganaa Maraykana ka hor 1972

Waa qof aan dhalasho Maraykan haysan oo soo galay Maraykanka 1-dii Bishii Koobaad 1972, ama taariikh kale oo ka dambeysay oo sharcigu sheegay, isla markaas si joogto ah u daganaa Maraykanka ilaa wakhtigaa, aanay u banaanayn dhalashada Maraykanku laakiin laga soo qaaday inuu si sharci ah wadanka u soo galay si uu si joogto ah wadanka u daganaado ka dib markii uu wareegto sharci ah soo saaray Xeer-ilaaliyaha Guud (Attorney General) iyadoo la eegayo Qaybta 249 ee xeerka INA (8 U.S.C. 1259); ama

3. Sharci qaxooti ama magan-galyo

Waa qof aan haysan dhalasho Maraykan oo si sharci ah u jooga Maraykanka ka dib markii la oggalaaday iyadoo la eegayo Qaybta 207 ee xeerka INA (8 U.S.C. 1157)(sharci qaxooti); ka dib siinta magangalyo (asylum) (taasoo aan la joojin) markii la eegay Qaybta 208 ee xeerka INA (8 U.S.C. 1158)(sharci magangalyo); ama iyadoo sababtu tahay siinta oggolaansho soo-galis shuruud leh markii la eegay Qaybta 203(a)(7) ee xeerka INA (8 U.S.C. 1153(a)(7)) ka hor 1-dii Bishii Afraad1980, iyadoo sababtu cadaadis ama ka-cabsi cadaadis ku saleysan qowmiyad, diin, fikrad siyaasadeed ama iyadoo sababtu tahay baro-kicin ay keentay afo wadan ku habsatay; ama

4. Sharci Damaanad (Parole)

Waa qof aan haysan dhalasho Maraykan oo si sharci ah u jooga Maraykanka iyadoo sababtu tahay wareegto u soo saaray Xeer-ilaaliyaha Guud sababo degdeg ah daraadood ama sababo laga soo qaaday inay ku jirto dan dadweyne marka la eego Qaybta 212(d)(5) ee xeerka INA (8 U.S.C. 1182(d)(5))(sharciga 'parole'); ama

5. Mastaafurinta Magangalyo-doon

Waa qof aan haysan dhalasho Maraykan oo si sharci ah u jooga Maraykanka iyadoo sababtu tahay Xeer-ilaaliyaha Guud oo ka joojiyay mastaafurinta markii la eegay Qaybta 234(h) ee xeerka INA (8 U.S.C. 1253(h))(halis naf ama xorriyad daraadeed); ama

6. Saamaxaad la siiyay

Waa qof aan haysan dhalasho Maraykan oo loo oggalaaday daganaansho ku-meel-gaadhsiis ah ama joogto ah markii la eegay Qaybta 245A ee xeerka INA (8 U.S.C. 1255a) (saamaxaad la bixiyay markii la eegay xeerka INA 245A).

? Maxaa aan u baahan ahay si aan u xaqiijiyo sharcigayga imigarayshanka ama dhalashada Maraykanka

Qofkii haysta dhalasho Maraykan, xaqiijintu waxay noqonaysaa Cadeyn Lahaansho Dhalasho Maraykan oo saxeehan.

Dadka aan haysan dhalasho Maraykan ee gaadhay 62 ama da' ka weyn

laga bilaabo 19-ka Bisha Lixaad 1995, cadeyntoodu waxay ka kooban tahay waxyaabahan:

- Cadeyn saxeehan oo ah Sharciga Imigarayshanka u Banaynaya Gargaarka
- Warqad ama dukumentii cadeynaya da'dooda

Dhamaan dadka kale ee aan haysan dhalasho Maraykan, cadeynta laga rabaa waxay ka kooban tahay saddexdan wax:

- Cadeyn saxeehan oo ah Sharciga Imigarayshanka u Banaynaya Gargaarka
- Foom Oggolaansho Xaqiijin oo saxeehan
- Mid ka mid ah waxyaabahan soo socda oo ka yimi Wasaaradda Imigarayshanka iyo Adeegyada Dhalashada Maraykanka (U.S. Department of Immigration and Naturalization Services): *I-551* (Alien Registration Card "Kaadhka Diiwaangalinta Shisheeyaha") ama *Form I-94* (Arrival Departure Record "Diiwaanka Soo-galista iyo Bixidda")
 - oo xusaya mid ka mid ah waxyaabahan:
 - Waxa loo oggalaaday qaxootinimo markii la eegay Qaybta 207
 - Qaybta 208 ama Magangalyo
 - Qaybta 243(h) amma Mastaafurinta waxa ka joojiyay Xeer-ilaaliyaha Guud
 - Damaanad la siiyay (Paroled) markii la eegay Qaybta 212(d)(5) ee xeerka INA

AMA

- *Form I-94* (Arrival Departure Record "Diiwaanka Soo-galista iyo Bixidda") oo aan xusayn, mid ka mid ah waxyaabahan soo socda:
 - Go'aan maxkamadeed oo kama-dambeys ah oo bixinaya magangalyo
 - Warqad ka timi sarkaal INS u qaabilsan magangalyada, ama warqad ka timi INS
 - Go'aan maxkamadeed oo bixinaya ka-joojinta mastaafuris
 - Warqad ka timi sarkaal INS u qaabilsan magangalyada oo bixinaysa ka-joojinta mastaafurinta

AMA

mid ka mid ah waxyaabahan soo socda:

- *Form I-688* (Temporary Resident Card "Kaadhka Daganaha Ku-meel-gaadhsiiska ah") oo xusaya Qaybta 245A ama Qaybta 210
- *Form I-688B* (Employment Authorization Card "Kaadhka Oggolaanshaha Shaqada") oo xusaya Qodob Sharci 274a.12(11) (Provision of Law 274a.12(11)) ama Qodob Sharci 274a.12 (Provision of Law 274a.12)
- Risiidh ka yimi INS oo sheegaya codsiga siinta dukumentii beddelaya mid ka mid ah kuwa sare.